

UJEEDO: OGEYSIIS QAADASHO ARDAY UMULISO BULSHO (Community Midwives)

Dugsiyada tababarka umulisoooyinka ee Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshadda ee ku kala yaalan **Mogadishu, Baydhabo iyo Kismayo**, waxay qaadanaayan arday cusub oo loo tababarayo Umuliso Bulsho (Community Midwives). Taas oo socon doonta mudo 36 bilood ama 3 sano.

Hadaba waxaa la ogaysiinayaa dhamaan ardayda ku dhaqan gobolada **Banadir, Shabeelada Hoose, Shabeelada Dhexe, Bay, Bakool, Gedo, Jubada Hoose iyo Jubada dhexe** ee haysta shahaado dugsi sare gaar ahaan gabdhaha danaynaya inay Bartaan Umulisoooyin qibrad sare leh, inay soo codsan karaan tababarka kor kuxusan.

Waana in ay soo buuxiyaan shuruudaha hoos kuxusan /qoran;

1. Codsadaha waa inuu heysto shahaado dugsi sare
2. Waa inay tahay dumar.
3. Waa in ay diyaar u tahay una hogaansanto heshiiska qaadashadda oo ay la galayso Wasaaradda Caafimaadka & Daryeelka Bulshada.

Waxaa laga doonayaa qofka daneynayo tababarkan inuu soo gudbiyo waxyaabahan hoos kuqoran:

1. Warqad Codsiga ah
2. Shahaadada dugsi sare oo copy ah
3. Labo sawir oo nooca teesaraha ah
4. Shahaado cadayn caafimad (medical certificate)
5. Gal bir leh (oo lagu xafido dokumentiga)

Qabashadda arajidda waxay soconeysaa mudo Isbuuc ah kana bilaabanaysa **4 Sep 2022 kuna eg 11 Sep 2022**, Tiradda la qaadanaayo oo aad u kooban darteed dagdag u gudbiso dukumintiyadda sare kuxusan.

Araajida waxaa lagu qabanayaa dugsiyada umulisoooyinka oo ku kala yaalo **Mogadishu, Baydhabo iyo Kismayo**

Ardayda ka imaanaysa gobolada **Banadir, Shabeelada Hoose iyo Shabeelada Dhexe** waxay ku hagaajinyaan arajidooda dugsiga tababarka umulisoooyinka ee Mogadishu ee kuyaala inta udhaxaysa isbitaal martiini iyo xabsiga dhexe

Ardayda ka imaanaysa gobolada **Bay, Bakool iyo Gedo** waxay ku hagaajin doonaan arajidooda Dugsiga Tababarka Umulisoooyinka ee kuyaala Baydhabo

Ardayda ka imaanaysa Gobolada **Jubada Hoose iyo Jubada Dhexe** waxay ku hagaajin doonaan arajidooda Dugsiga Tababarka Umulisoooyinka ee kuyaala Kismayo

Waxii faahfaahin ah kala xiriir: **0613822416**